



Tixraac:XRW/ 237/11/2020

Tariikh:04/11/2020

Xeer Ra'iisal Wasaare

Magacaabidda Guddiyada Doorashooyinka iyo Xallinta Khilaafaadka ee Heer Federaal

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;

Markuu Arkay: Qodobbada 99^{-aad} iyo 100^{-aad} ee Dastuurka Ku-Meel-Gaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya,

Markuu Arkay: Warmurtiyeedkii ka soo baxay Shirkii looga heshiyay habraacyada doorashooyinka oo ay si wadajir ah u gaareen Madaxda Dowladda Federaalka iyo Madaxda Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka 1^{dii} **Oktoober 2020**, ee lagu go'aamiyey dhismaha Guddiyada Doorashooyinka ee Heer Federaal iyo Xallinta Khilaafaadka (GDHF/GXKHF), si ay iskula jaanqaadaan dhammaan Guddiyada arrimaha doorashooyinka.

Markuu Arkay: Mas'uuliyadaha, Waajibaadka iyo qaab-dhismeedka guddiyada oo ka kooban 25 xubnood oo ah Guddiga Doorashada ee heer Federaal iyo 21 xubnood oo ah Guddiga Xalinta khilaafaadka.

Markuu Tixgaliyay: Magacaabiddii xubnaha ay soo magacaabeen Madaxda Dowlad Goboleedyada Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Markuu Arkay: Baahida loo qabo Magacaabidda Guddiyada Doorashooyinka ee Heer Federaal iyo Xallinta Khilaafaadka (GDHF/GXKHF).



Qodobka 1aad Magacaabid

Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda JFS, wuxuu magacaabay Guddiyada kala ah guddiga Doorashada Heer Federaal iyo guddiga Xallinta khilaafaadka doorashooyinka 2020/21, magacyadooduna hoos ku xusan yihiin:

Guddiga Doorashooyinka ee Heer Federaal 2020-2021

1. Cabdiwali Maxamuud Cilmi
2. Maxamed Xasan Maxmed
3. Mahad Dheere Xaashi
4. Mowliid Mataan Salaad
5. Faadumo Maxamed Cabdullaahi
6. Cabdiraxiin Cabdicasiis Adam
7. Caasho Abuukar Qaasim
8. Madiina Adan Malaboow
9. Cabdinuur Maxamed Axmed
10. Saciido Maxamed Muscid
11. Maxamed Aadan Cusmaan
12. Faaduma Cabdirisaaq Sheekh Ciise
13. Axmed Maxamed Ducaale
14. Caydaruus Saalax Yuusuf
15. Cabdijabaar Cabdullaahi Faarax
16. Liban Abukar Osman.
17. Yusuf Mohamed Kheyr
18. Muse Geelle Yusuf
19. Cabdiweli Cali Cabdulle (Timacade)
20. Cabdicasiis Sheikh Xuseen Dayib
21. Xaawa Xaaji Maxamed Malindi
22. Liibaan Axmed Xasan
23. Cabdiaziz Cabdiraxman Yusuf
24. Cabdinaasir Maxamed Guuleed
25. Maxamed Maxamuud Caddow

Guddiga Xalinta Khilaafaadka ee Doorashooyinka 2020-2021

1. Axmed Ciise Geelle
2. Maxamed Faarax Xirsi
3. Cali Maxamuud Faarax (Cali Zeko)
4. Nimco Axmed Cabdi
5. Maxamed Aweys Maxamed
6. Abdulqaadir Xuseen Cabdi
7. Cabdullaahi Abyan Nuur
8. Xuseen Laki Maxamed Maxamuud
9. Saaqo Aadan Maxamed
10. Cabdirisaaq Cali Kaahin
11. Amal Musdafa Muuse
12. Mohamed Ibrahim Barre



[Handwritten signature]

13. Abdi Mohamed Sheikh
14. Burhaan Cilmi Xirsi
15. Yasmiin Maxamuud Cabdi Xaamud
16. Warfaa Maxamed Jaamac
17. Axmed Yuusuf Maxamuud
18. Garaad Yusuf Maxamuud
19. Mustafa Macalin Cali Salaad
20. Farxiyo Xasan Cusmaan.
21. Liibaan Cusmaan Nuur

Qodobka 2aad

Waxaa xubnaha guddiga doorashooyinka heer federal iyo Guddiga Xallinta khilaafaadka ee xeerkan ku magacaaban la farayaa in ay si hufnaan iyo caddaalad ku jirto u gutaan waajibadkooda shaqo ee ku qeexan heshiiska habraaca doorashooyinka oo ay soo saareen Golaha wada tashiga qaranka. .

Qodobka 3aad **Dhaqan-galka Magacaabidda**

Magacaabiddani waxay dhaqan-galaysaa isla marka uu saxiixo Ra'iisul-Wasaaraha Xukuumadda JFS, waxaana lagu soo saaraya Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Fulin Wacan,



Mudane: Maxamed Xuseen Rooble
Ra'iisul Wasaaraha Xukuumada JFS